

XALAY MAXAA CAAWA UGA EG. qaybta 1aad.

Xikmada Quraanku waa mid aan dhamaan had iyo jeerna waaqica lasocota, Qur,aan badan ayaa kusoo degay inuu ka sheekeeyo taariikhdiisii ummadihii inaga horreeyay si aynu ugu cibro qaadanayo.

Waxaa in badan Qur,aanku ka waramay dadka muslixiinta ah (Nabiyada iyo Salixiinta) dadka qaarkood inay u arkaan inay fasaad wadaan oo ay aduunka kharibayaan, aragtidaasi badanaa waxay ku saabsanayd qofku inuu ilaashado mansab uu haysto ama mid uu damacsan yahay inuu gaaro.

Haddii aan dib u eegno wixii kala haystey Anbiyadii Allaah iyo qoomamkii kala duwanaa ee mid walba loo soo diray, Nabi nuux (CS) iyo qoomkiisii waxay ku yiraahdeen, reer Caad waxay ku yiraahdeen Nabiyulaah Huud (CS), reer Thamuud iyo wixii dhexmaray Saaslix (CS).

Waxaynu oo kale tusaale usoo qaadan karnaa Asxaabul Ukhduud dadkaas waxaa loo laayay inay rabbigood ku toosnaadeen oo rumeeyeen waxaana loo arkay inaysan la jaanqaadi Karin wixii meeshas lagu hayay. Waxaa taa kuula mida Asxaabul Kahf oo iyaga laftigoodu ku eedoobay rumaynta ilaahood iyo inay diideen xumihii ay dadkaasi ku dhaqmayeen(Shirki). Waxaan iyana taas ka fogayn nimankii Asxaabul Qaryah ee ilaahay labada rasuul usoo diray markay diideenna mid kale kusoo xoojiyay hase heeshee dhammaanba loogu goodiyay in la layn doono wanaagga ay wadaanna aan raalli laga ahayn. Waxaa dariiqaas soo wada maray dhammaan anbiyadii ilaahay soo diray kuwaaso qaar la dilay kuwo ay sigteen kuwo kalana ay ka haajireen degaankoodii.

Waxaad iyana dib u eegtaa Fircoon oo raba inuu difaacdo saldanadiisa una arkay in Nabi Muuse(scw) khatar ku yahay, kasoo soo saaray fatwo uu dhiiggiisa ku banneeyay hadaba waa maxay daliisha fatwadu? Waxaa baqdin iyo wel wel iga hayaa ayuu yiri in Nabi Muuse diintiina idinka baddalo ama uu dhulka fasaad caam ah ka buuxiyo, sidaa darteed waa in aduunka la dhaafiyo.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ ذَرُونِي أَقْتُلْ مُوسَى وَلْيَدْعُ رَبَّهُ إِنِّي أَخَافُ أَنْ يُبَدِّلَ دِينَكُمْ أَوْ أَنْ يُظْهِرَ فِي الْأَرْضِ الْفَسَادَ { غافر: 26 }

Hadaba waxa la yaableh sida afkaarta Ahlu baadilku is waafaqdo saman kasta oo ay joogaan iyadoo aysan farqi u kala samaynayn, jinsiga, midabka,iyo waxa ay rumaysan yihiin toonna, maadaama saldhigga ay ka duulayaan uu ku salaysan yahay baadil, dulmi ama bidco laga fili maayo inay xaqa ku toosaan. (لا يستقيم الظل والعود أعوج), sida aan laan qaloocan hooskeedu u toosnaan. Laakiin hadalkoodu isma khilaafu sidii iyagoo heshiis wada galay oo weliba isu dardaarmay. (أتواصوا به بل هم قوم طاغون).

Taariikhda yaabkeeda waxa hadda ina dhex jooga oo **cibro inoo ah** wadaad soo xiganaya qaacidadii Fircoon,iyo kuwii la midka ahaa, fatwana ku bixiyey in la laayo culimada umada soomaliyeed dhexdooda caanka ka ah laguna yaqaaney fidinta diinta islaamka iyo caqiidada saxda ah, dilka culimada lagu xukumay sababtiisu waa tii Fircoon iyo intii aynu kor kusoo xusnay ee ahayd inay fasaad umada dhexdooda ku hayaan, weliba waxaad

fadliga weyn ee mujaahidnimo ku gaaraysaa ayuu ku daray haddii aadan xilli iyo xaramba ku dhaafin oo aad Salaadda iyo Masjidka ugu gabbato oo aad ku gaadid Rukuucda, Sujuuda iyo Qiyaamka, iyo Tasbiixda.

Farqiga u dhexeeya labada fatwo:

Farqiga kaliya ee muuqda waxa weeye Fircoon oo aan qabin Nabi Muuse la dilo inuu darajada sare ee shahiidnimo heli doono, halka wadaadku qabo caalimkii la dilaa inuu shahiid noqonayo ninkii dilaana uu mujaahid yahay, waana farqi xaga caqliga iyo fahamka ah oo labada mufti is dheer yihiin.

Hadii si kale loo dhigo Sheekh Abdulqaadir Nuur Faarax iyo Dr.Axmed Xaaji Abdirahman oo dhawaan fatwada lagu fuliyey iyo culimo kale oo badan oo lagu laayey koonfurta Somaaliya iyaga iyo cidii laysayba waa mujaahidiin iyo shuhadaa!

Sida aan ognahay culimada la laayey waxay umadda bari jireen in xataa haddii jihaad xaq ah lagu qaado gaalo, in la nabad galiyo culimadooda, kaniisadahooda, dadka waaweyn, dumarka iyo caruurta, maxay kula tahay haddii culima gaaleedka dilkooda la diidey, culimada muslimiinta ee diinta ku ciraystay miyaa dilkooda janno lagu gali karaa? Cid kalese ma uga baahanahay inay fatwo naga siiso dhiigooda lagu banaysto? waa maxay fasaadka inoo haray markaan culimada iyo ciddii kale oo wax kala garanaysa layno?.

Waxa kale oo fatwada ka muuqata in wadaadku uu dhab ahaan naftiisa ku xukumay dil maadaama fasaadka dhiiga culimada lagu daadiyey ay xagiisa ka timid kaas oo uusan jirin fasaad ka wayn. Haddi caqligiisa ama fiqigiisa diinta iyo fatwadiisa loo raaco waa in la dilo waana sida uu xukumay. Waxaan jeclahay in la waydiiyo in ciddii adduunka dhaafisa isaga ay qaadan karaan darajada mujaahidnimo?.

Waxaa is waydiin leh, Fircoon iyo wixii la halmaalay ujeedadooda garanay oo waxay wanaagga iyo khayrka u diidanaayeen waa mansab ay ilaashanayeen sida aynu horay usoo sheegnay, laakiin wadaadkani ma wuxuu darajada culimonimo ku raadinayaa inuu iska horleexiyo ninkii uu u arko inuu ka cilmi badan yahay. Waxay isoo xasuusisay fatwada wadaadku hadal nin gaal ah oo la oran jiray Mechiavelli uu yiri (The end justifies the means) taas oo uu ula jeeday yoolkaaga waa inaad gaartaa dariiqii aad doontidba usoo mare, taas oo ay ka dhalanayso inaad ixtiraamin akhlaaqda, insaanayada, aadanna tix gelin wax xuquuqa laakiin ujeedadaadu tahay inaad hiigsatid hadafkaaga oo kaliya.

Arigti kale oo soo xoogaysanaysa ayaa sheegaysa in Sheekhu xirfad kale leeyahay oo gacansaar ka dhexeeyo ururo shabaabka iyo qayrkoodba ah, Sheekhu wuxuu fatwo ku toogtaa umad soomaliya masaajida ku yaal ku tukanaysa isagoo wadan gaalo jooga, mar mar baan maqalaa waa la xiray 3 maalmood, laakiin xaqiiq ahaan ma la xiray? Sheekh Abdulqaadir (Raximahullaah) 3 sano ku dhawaad ayuu dowlad u xiraa isagoo aan wax gaysan aan ka hayn inuusan ku qancin xukunkii wadaadada soomaaliyeed lagu laayey waqtigaas. Waxa kale oo la ogyahay in dad wax ka dhagaysta hareerahiisa laga ugaarsado, xaqiiqda Rabbi ayaa og laakiin shakigu ma yara. qoraalada soo soo socda ayaynu ku eegaynaa casharo kale oo taariikhdu soo celisey. inshalaah.